



SABABTA KA QAYB QAADASHADA IMTIXAANKA GOBOLKU MUHIIMKA UGU YAHAY ARDAYDA

Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku li Caawinayaan?

- Waxay ku siinaysaa fursad aad ku muujiso waxa aad taqaano ee sameyn karto dhanka xirfadda Luqadda Ingiriisiga, xisaabta, iyo sayniska. Tani waxay gacan ka geysataa qaabeynta waxa aad diiradda saarayso waxbarashada xigta.
- Wuxuu adiga iyo qoyskaaga siiyaa macluumaad lagu kalsoonaan karo oo aad u isticmaali karto si aad u barbar dhigto macluumaadka kale ee qiimeynta, sida heerarka fasal iyo natiijooyinka qiimeynta dugsiga iyo degmada.
- Ka qayb qaadashadu waxay macallimiinta iyo hoggaamiyayaasha dugsiga siisaa macluumaad si loo horumariyo manhajka dhaqanka waxbarida ee ay adeegsanayaan si loo taageero ardayda oo dhan.
- Imtixaanku waa qayb joogto ah oo ka mid ah waxbarashada wuxuuna gacan ka geystaa hagista go'aanada waxbarasho ee gaarsiisan heerka nidaamka tanina waa dhaqan wanaagsan oo la iskugu diyaariyo imtixaanka ay dhici karto in aad kula kulanto kulliyaddaada iyo/ama safar shaqo.

Ma ogeyd?

Dowladda Maraykanka ayaa 2015-kii ansixisay xeer **faraya** imtixaan gobolka oo dhan ee darajooyin iyo maadooyin gaar ah. Dhammaan ardayda ku jirta heerarkan fasal waxay qaataan imtixaanaadka gobolka.

Waqti aan sidaa u fogayn, ardayda qaarkood **kuma aysan jirin** imtixaanka, sida ardayda naafada ah iyo ardayda federaal ahaan loo aqoonsaday in ay yihiin Bartayaasha Ingiriiska.

Iyada oo sababtu tahay ardayda oo **dhan** oo qaata imtixaan isku mid ah, dugsiyada iyo macallimiintu waxay ka fikiri karaan ardayda oo **dhan** marka ay wax qorsheynayaan.

Maxay yihiin waxyaabaha Qaarkood ee ay Tahay in Maskaxda Lagu Hayo?

- Haddii qaadashada imtixaanka aad ka naxdo, ku dhaqan xeelado kaa caawiya in aad is dejiso inta lagu jiro imtixaanka (tusaale, jimicsiga neefsiga, iskala bixinta, dabcinta muruqa).
- Qoyskaaga ama macallinkaaga kala hadal haddii ay jiraan waxyaabo kuu fududayn kara in aad qaadato imtixaanka gobolka Oregon, sida waqti dheeraad ah iyo meel degan.

LA XIRIIR

[Bogga Internet-ka ee Kooxda Qiimeynta ODE](#)



Fadlan wixii su'aalo ah, faallooyin ah, ama talooyinka u soo dir:

ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov

Ilaha Qiimeynta ODE

[Koorsooyinka Tababarka ee Qiimeynta Waalidka ee Akhriska/Qoraalka](#)